Somalia Non-State Actors
SONSA
Jilayaasha aan Dowliga aheyn ee Soomaaliyeed

# SONSA Bulletin

SEPTEMBER *Civil Society Monthly Newsletter* 2025




**Bulshada Rayidka Soomaaliyeed SONSA oo soo gebagebeeysay Doodo Muhiim ah oo Dib-u-eegista Dastuurka KMG Ku Saabsan– 1-da September 2025**

Magaalada Muqdisho, hay'adda Somali Non-State Actors (SONSA) oo kaashanaysa mashruuca Gole-Kaab ayaa soo gebagebeeyay kulan dib-u-eegis ah oo ku saabsan Dastuurka KMG ah ee Soomaaliya iyo sharciyada muhiimka ah ee la xiriira, iyadoo si gaar ah diiradda loo saarayay xaaladda siyaasadeed ee caasimadda Muqdisho.

Kulankan waxaa ka qaybgalay odayaasha dhaqanka, haween, dhallinyaro, aqoonyahanno, xarumaha cilmi-baarista, mas'uuliyiin dowladeed iyo ururrada bulshada rayidka ah. Doodaha waxay xoogga saareen muranka soo jireenka ah ee ku saabsan xaalada Muqdisho iyo baahida loo qabo in dastuurka si hufan loogu qeexo xuquuqda iyo matalaadda shacabka caasimadda.

Furitaanka madasha waxaa jeediyay Mama Duniya Maxamed Cali oo ka tirsan hormuudka bulshada rayidka, iyadoo ugu baaqday Baarlamaanka Federaalka in ay xal cadaalad ah u helaan caasimadda kadib sannado badan oo wadahadaladu hakad ku jireen. Dhallinyarada ayaa sidoo kale codkooda ku biiriyay, iyadoo Omar Cabdiraxmaan Maow, Guddoomiyaha Dhallinyarada Banaadir, uu Baarlamaanka ku booriyay in uu xaqiijiyo matalaadda muddo dheer la sugayay ee gobolka.

Doodda ayaa muujisay baahida loo qabo sinaan, wadajir iyo ka-qaybgal dhab ah, iyadoo bulshada rayidka ahi ku adkaysatay sida ay uga go'an tahay in ay hormuud ka noqdaan dib-u-habeynta dastuurka si loo ilaaliyo codka iyo xuquuqda dhammaan bulshada Soomaaliyeed.




**Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo Ka Qaybgashay Qiimaynta Cilmi Baaris Dib Uheshiisin "Conciliation Barometer" – 8-da September 2025**

Magaalada Muqdisho, ururrada bulshada rayidka Soomaaliyeed oo uu hoggaaminayso Dalladda SONSA ayaa ka qaybgalay shirkii toddobaad iyo siddeedaad ee heer qaran ee lagu qiimaynayay xogta Conciliation Barometer. Kulankan oo socday laba maalmood waxaa soo qabanqaabiyay Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta, waxaana si wadajir ah u fududeeyay SeeD Cyprus, Dhaxalreeb, PDRC iyo How to Build Peace.

Ujeedada shirka ayaa ahayd in dib loo eego lana ansixiyo xogta la xiriirta dib-u-heshiisiinta, iyadoo loo marayo wadahadallo iyo dood cilmiyeed lala yeesho bulshada rayidka iyo daneeyeyaasha kale ee muhiimka ah.

Ka qaybgalayaasha waxay falanqeeyeen tilmaamayaasha xog ururinta heer dowlad-goboleed, hab-raaca fikradda HeshiisBeeg, iyo ujeedooyinka iyo habboonaanta dhaqan ee geeddi-socodka dib-u-heshiisiinta. Kooxda SONSA ayaa si firfircoon uga qaybqaadatay shaqo kooxeed, soo jeedinta talooyin ku dhisan caddayn, iyo hindise cusub oo ay ka mid yihiin adeegsiga warbaahinta dhijitaalka ah si loo taageero xasilinta.

Shirkan wuxuu qayb ka yahay Hirgelinta Qaab-dhismeedka Qaranka ee Dib-u-heshiisiinta oo la daahfuray bishii Abriil 2024, kaas oo ujeeddadiisu tahay in wax laga qabto tabashooyinkii taariikhiga ahaa, lagu dhiso kalsooni, isla markaana la xoojiyo wada-noolaanshaha bulshada Soomaaliyeed ee waara.




**Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo Ka Qaybgashay Daahfurka Istaraatiijiyadda Qaranka Ee Horumarinta Reer Miyiga – 10-ka September 2025**

Xubnaha bulshada rayidka Soomaaliyeed oo uu hoggaaminayo Somali Non-State Actors (SONSA), isla markaana uu horkacayay Guddoomiyaha SONSA Mudane Osman Moallim, ayaa ka qaybgalay daahfurka geeddi-socodka diyaarinta Istaraatiijiyadda Horumarinta Miyiga Qaranka.

Munaasabaddan waxaa soo qabanqaabiyay Xarunta Qaranka ee Horumarinta Miyiga iyo Xalalka Waara (NCRDS) ee Dowladda Federaalka Soomaaliya. Waxaana lagu asteeyay bilowga dadaal mideysan oo heer qaran ah oo lagu xoojinayo horumarinta miyiga dalka.

Istaraatiijiyaddan cusub waxay isku keenaysaa hay'adaha dowladda, ururrada bulshada rayidka iyo bulshada deegaanka si loo wajaho caqabadaha taariikhiga ah ee ka jira miyiga, isla markaana loo helo xalal waara. Guddoomiyaha SONSA ayaa khudbaddiisa ku adkeeyay muhiimadda ay leedahay in la mideeyo dadaallada si isbeddel wax ku ool ah loogu keeno bulshada miyiga Soomaaliyeed. Waxa uu carabka ku adkeeyay meelaha mudnaanta leh oo ay ku jiraan: ballaarinta adeegyada aasaasiga ah ee bulshada, dhiirrigelinta maalgelinta beeraha, iyo dib u dhiska kaabayaal muhiim ah oo taageeri kara nolol maalmeedka dadka.

Daahfurka istaraatiijiyaddan waxaa lagu tilmaamay tallaabo muhiim ah oo NCRDS qaaday, taas oo horseedi karta xalal waara oo wax ka beddeli kara heerka nolosha ee bulshada miyiga. Geeddi-socodkan waxaa la filayaa inuu saldhig u noqdo horumar waara, ka-qaybgal ballaaran iyo isbeddel togan oo laga dareemo guud ahaan deegaannada miyiga Soomaaliya.




**Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo Ka Qaybqaadatay Doodaha Qorshaha Isbeddelka Qaranka NTP – 16-ka September 2025**

Bulshada rayidka Soomaaliyeed ayaa ka qaybgalay shirarka kooxaha tiirarka ee uu soo qabanqaabiyay Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya. Shirarkan ayaa qayb ka ahaa geeddi-socodka diyaarinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka 2025–2029, kaas oo lagu dejinayo mudnaanta horumarineed ee dalka shanta sano ee soo socota.

Kulamada ayaa isu keenay wakiillo ka kala socday dowladda federaalka, dowlad-goboleedyada, Qaramada Midoobay, deeq-bixiyeyaasha, ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo ururrada bulshada rayidka. Waxaana loo arkay madal ballaaran oo lagu qaato talooyin iyo aragtiyo muhiim u ah jihaynta siyaasadeed iyo horumarineed ee mustaqbalka Soomaaliya.

Wakiillada bulshada rayidka ah ayaa si firfircoon uga qaybqaatay doodaha, iyagoo diiradda saaray arrimo muhiim u ah dowlad wanaagga iyo xasilloonida. Waxyaabaha ugu waaweyn ee la xusay waxaa ka mid ahaa: siyaasadda loo dhan yahay, dib-u-heshiisiinta, ilaalinta sharciga, xuquuqda aadanaha, xasillinta, helitaanka caddaaladda iyo dadaallada lagula tacaalayo xagjirnimada rabshadaha wata.

Doodaha kale ayaa sidoo kale xoogga saaray muhiimadda ay leedahay isbeddel dhaqaale oo waara, gaar ahaan dhinacyada la xiriira sugnaanta cuntada, kaabayaasha u adkaysta cimilada, helitaanka tamar, horumarinta tiknoolojiyadda iyo isgaarsiinta, iyo abuurista shaqooyin. Ka qaybgalka bulshada rayidka ayaa muujiyay kaalintooda muhiimka ah ee dejinta qaab-dhismeed lagu gaari karo xasillooni waarta, horumar iyo adkaysi mustaqbalka Soomaaliya.



**Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo Ka Qaybgashay Shirweynaha Sannadlaha ah ee La-xisaabtanka Baarlamaanada Oo Ka Dhacay South Afrika– 17-ka September 2025**

Dalladda Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee SONSA, oo uu hoggaaminayay Guddoomiye Mudane. Osman Moallim, ayaa ka qaybgalay shirkii shanaad ee Sannadlaha ahaa ee Ururrada La-xisaabtanka iyo La-shaqeynta Baarlamaanada (PEMOs), kaas oo ka dhacay magaalada Pretoria ee dalka Koonfur Afrika. Shirkan oo lagu qabtay hal-ku-dhigga “Getting Back on Track: Renewing the Dialogue Between Legislatures and Civil Society” ayaa isu keenay ururrada la-xisaabtanka baarlamaanada ee ka kala yimid dalal badan oo Afrika ah.

Ka qaybgalayaasha ayaa wadaagay khibradahooda ku saabsan la-xisaabtanka, is-weydaarsaday casharro iyo hab-raacyo, isla markaana ka dooday fursadaha lagu xoojin karo iskaashiga u dhexeeya baarlamaanada, bulshada rayidka iyo shacabka.

Bulshada rayidka Soomaaliyeed, oo taageero ka heshay Machadka NIMD, ayaa si firfircoon uga qaybqaadatay doodaha, iyagoo xoogga saaray dhismaha kalsoonida iyo xoojinta dowlad wanaagga ku dhisan isla-xisaabtan iyo daahfurnaan.

Ka qaybgalka SONSA wuxuu muujiyay muhiimadda ay leedahay in dood loo dhan yahay oo rasmi ah ka dhex socoto hay’adaha sharci-dejinta iyo bulshada rayidka Soomaaliyeed. Sidoo kale, waxay fursad u noqotay in Soomaaliya lagu soo bandhigo waayo-aragnimadeeda isla markaana laga faa’iidaysto khibradaha iyo tusaalooyinka dalalka kale ee Afrika. Shirkan ayaa mar kale xoojiyay kaalinta bulshada rayidka ee horumarinta daahfurnaanta, isla-xisaabtanka iyo maamul wanaagga Soomaaliya.



**Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo Ka Qaybgashay Tababar ku Saabsan Miisaaniyadda Dalka iyo Is Waafajinta Xuquuqda Aadanaha – 17-ka September 2025**

Xubno ka socday bulshada rayidka Soomaaliyeed, oo ay ka midyahay Mudane. Xuseen Maxamed Ciyaaye, ayaa ka qaybgalay tababar saddex maalmood socday oo ku saabsan falanqaynta miisaaniyadda guud iyadoo laga eegayo dhinaca xuquuqda aadanaha. Tababarkan oo ka dhacay Muqdisho intii u dhaxaysay 15–17 September, waxaa sidoo kale ka qaybgalay 20 xildhibaan oo ka socday Baarlamaanka Federaalka iyo baarlamaanada dowlad-goboleedyada.

Tababarkan waxaa soo qabanqaabiyay Waaxda Xuquuqda Aadanaha ee Qaramada Midoobay (UNSOM) iyada oo iskaashi lala sameeyay Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha. Ujeeddada ugu weyn ayaa ahayd in la xoojiyo sida xuquuqda aadanaha loogu dhex dari karo geeddi-socodka diyaarinta iyo hirgelinta miisaaniyadaha heer qaran iyo heer dowlad-goboleed.

Hindisahan, oo ay taageereen Xafiiska Sare ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Xuquuqda Aadanaha (OHCHR) iyo Qaramada Midoobay guud ahaan, ayaa xildhibaanada siiyay xirfado iyo qalab wax ku ool ah oo lagu dhiirrigelinayo go’aan qaadasho daahfuran, loo dhan yahay, isla markaana lagu hubiyo isla-xisaabtan maaliyadeed.

Bulshada rayidka ayaa ka qaybgalay tababarka iyagoo ah ka-qaybgaleyaal iyo fududeeyayaalba, iyagoo soo bandhigay aragtiyo ka tarjumaya baahiyaha bulshada. Ka qaybgalka SONSA iyo ururrada kale ee bulshada rayidka ah wuxuu muujiyay muhiimadda ay leedahay in miisaaniyaddu ku salaysnaato xuquuqda aadanaha isla markaana mudnaanta la siiyo adeegyada caddaaladda iyo sinaanta ku dhisan. Tababarkani wuxuu calaamad u noqday tallaabo horay loogu qaaday dhanka dowlad wanaagga bulshada ku dhisan iyo xoojinta daahfurnaanta maamulka guud ee Soomaaliya.







## Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo Daahfurtay Mashruuca Taageerada Dhismaha Dowladnimada iyo Dib-u-heshiisiinta (SRSP) – 18-ka September 2025

Dalladda Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee SONSA ayaa si rasmi ah u daahfuray Barnaamijka Taageerada Dhismaha Dowladnimada iyo Dib-u-heshiisiinta (SRSP), iyadoo taageero ka helaysa Barnaamijka Horumarinta Qaramada Midoobay (UNDP).

Barnaamijkan ayaa loogu talagalay in lagu xoojiyo ka-qaybgalka shacabka iyo bulshada rayidka ee geeddi-socodka socda ee dhismaha dowladnimada iyo dib-u-heshiisiinta Soomaaliya. Waxa uu siinayaa madal dood furan iyo kulamo heer qaran ah oo lagu xoojinayo iskaashiga ka dhexeeya bulshada rayidka iyo hay'adaha dowladeed.

Munaasabadda daahfurka waxaa furay Guddoomiyaha SONSA, Mudane Osman Moallim, kaas oo xusay doorka barnaamijku ku leeyahay mideynta bulshada rayidka Soomaaliyeed iyo kobcinta wada-shaqaynta lagu taageerayo maamul wanaag iyo dhismaha nabadda. Sidoo kale, Guddoomiyaha PUNSAA, Mudane Cabdiraxmaan, ayaa soo dhoweeyay mashruuca, isagoo sheegay inuu kor u qaadi doono kaalinta bulshada rayidka ee qaabaynta mustaqbalka Soomaaliya.

Ururro badan oo xubno ka ah SONSA ayaa taageeray hindisahan, iyagoo ku tilmaamay tallaabo muhiim ah oo lagu dhisayo midnimo gudaha bulshada rayidka, isla markaana lagu xaqiijinayo in codka bulshada laga qaybgeliyo go'aan-qaadashada heer qaran. Daahfurka SRSP waxa uu calaamad u noqday marxalad muhiim ah oo horay loogu qaaday xoojinta dowlad wanaagga loo dhan yahay iyo dadaallada dib-u-heshiisiinta Soomaaliya.

## Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo Ka Qaybgashay Aqoon-isweydaarsiga Qiimaynta Diyaar-garowga Dijitaalka – 18-ka September 2025

Kooxda mashruuca ReCIPE ee xafiiska Dalladda SONSA ayaa ka qaybgalay aqoon-isweydaarsi heer qaran ah oo ku saabsan qiimaynta diyaar-garowga dhijitaalka, kaas oo ay soo qabanqaabisay Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknoolajiyadda iyadoo taageero ka helaysa Barnaamijka Horumarinta Qaramada Midoobay (UNDP). Kulankan ayaa isu keenay wakiillo ka socday bulshada rayidka, khubaro ICT iyo hay'adaha dowladeed si ay u daraaseeyaan heerka diyaar-garowga dhijitaalka Soomaaliya loona dejiyo mudnaanta isbeddel dijitaal oo loo dhan yahay.

Qiimaynta UNDP ee Digital Readiness Assessment waxay bixisaa sawir guud oo ku saabsan nidaamka dhijitaalka dalka, iyadoo loogu talagalay inay hagto siyaasado ku dhisan xog-caddeyn si loogu horumariyo Yoolalka Horumarka Waara (SDGs), iyadoo la hubinayo inaan cidna laga tagin.

Aqoon-isweydaarsigu waxa uu muujiyay muhiimadda ay leedahay qorshayn wadajir ah oo lagu qaabeeyo mustaqbalka dijitaalka Soomaaliya. Ka qaybgalayaashu waxay falanqeeyeen sida awoodda dhijitaalka ee la xoojiyo ay u horumarin karto adeeg bixinta, u ballaarin karto helitaanka macluumaadka, isla markaana u abuuri karto fursado hal-abuurnimo iyo koboc dhaqaale. Hindisahani waxa uu si dhow ula jaanqaaday mashruuca ReCIPE oo ay iska kaashadaan Midowga Yurub iyo Oxfam Ireland, kaas oo SONSA ka fuliso gudaha Soomaaliya.

Iyadoo loo marayo dadaalladan, bulshada rayidka Soomaaliyeed ayaa ka shaqaynaysa sidii loo dhiirrigelin lahaa xuquuqda dhijitaalka ah isla markaana loo hubin lahaa in xuquuqda aadanaha lagu daro ajandaha isbeddelka dijitaalka dalka.



**Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo Martigelisay Aqoon-isweydaarsi ku Saabsan Xuquuqda Dijitaalka iyo Ka-qaybgalka Naafada Soomaaliyeed – 20-ka September 2025**

Dalladda SONSA ayaa 20-ka September 2025 ku qabtay magaalada Muqdisho aqoon-isweydaarsi heer qaran ah oo ay ka qaybgalayeen daneeyayaal kala duwan, si loo taageero diyaarinta warbixinno siyaasadeed (policy briefs) oo ku saabsan xuquuqda dhijitaalka, iyadoo diiradda lagu saaray maamulka baraha bulshada iyo ka-qaybgalka dadka naafada ah. Kulankan oo lagu qabtay Hoteelka Jazeera Palace waxaa si rasmi ah u furay Cabdifataax Ibraahim oo ka socday Oxfam Somalia, kaas oo carrabka ku adkeeyay muhiimadda iskaashiga ee horumarinta siyaasado xuquuq ku dhisan oo loo dhan yahay.

Aqoon-isweydaarsigan ayaa ka tarjumay dadaallada sii kordhaya ee lagu hubinayo in isbeddelka dhijitaalka Soomaaliya uu ku socdo hab-raacyo loo dhan yahay, isla-xisaabtan leh, kana jawaabaya baahiyaha bulshada.

Kulanka ayaa isu keenay qaybaha kala duwan ee bulshada, oo ay ku jireen ururrada bulshada rayidka, shirkadaha gaarka loo leeyahay, jaamacadaha, ururrada qareennada, xarumaha cilmi-baarista, shabakadaha dadka naafada ah, mas'uuliyiin dowladeed, dhalinyaro tababaran, iyo saameeyayaasha baraha bulshada. Ka qaybgalayaashu waxay dood kooxeed iyo soo jeedinno ku biiriyeen talooyin ku saabsan Qabyo-qoraalka Siyaasadda Qaranka ee Maareynta Khatarta ku Timaada Isticmaalka Baraha Bulshada (2025–2030).

Talooyinkii kasoo baxay waxay xooga saareen muhiimadda habab loo dhan yahay oo ay dadka naafadu qayb ku leeyihiin, horumarinta jawi internet oo ammaan ah, iyo isku xidhka xuquuqda dhijitaalka ah iyo ujeedooyinka ballaaran ee Soomaaliya ee ku saabsan dowlad wanaagga iyo horumarka.




**Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo Xustay Maalinta Caalamiga ah ee Nabadda – 21-ka September 2025**

Bulshada rayidka Soomaaliyeed ayaa xustay Maalinta Caalamiga ah ee Nabadda, iyagoo ugu baaqay dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada in ay qaataan mas'uuliyad wadajir ah si loo xoojiyo xasilloonida iyo dib-u-heshiisiinta dalka. Wakiillada bulshada rayidka ayaa carrabka ku adkeeyay in nabad waarta oo Soomaaliya ka hirgasha ay ku xirantahay ka-qaybgal dhab ah oo ka yimaada dowladda, mucaaradka iyo shacabka guud ahaan. Waxaa la xusay in mustaqbal ammaan ah oo rajo leh oo dalka loo dhisaa uu ku imaan karo oo keliya marka dhammaan daneeyayaasha ay si dhab ah uga wada shaqeeyaan dhismaha nabadda.

Xuska sanadkan ayaa ku dhacay hal-ku-dhigga caalamiga ah ee "Act Now for a Peaceful World" oo muujinaya muhiimadda degdegga ah ee dhaqan-gelinta nabadda xilliyada qalalaasaha iyo hubanti la'aanta.

Bulshada rayidka Soomaaliyeed ayaa ku nuuxnuuxsaday baahida loo qabo in tallaabooyin dhab ah la qaado oo ka baxsan hadal iyo ballan-qaad, iyadoo diiradda lagu saarayo ka-qaybgal loo dhan yahay, dib-u-heshiisiin iyo dadaallada lagu dhisayo kalsooni bulsho.

Iyagoo la jaanqaadaya hal-ku-dhigga caalamiga ah, bulshada rayidka ayaa mar kale xaqiijiyay sida ay uga go'an tahay horumarinta xasilloonida waarta iyo hubinta in nabaddu noqoto tiir-dhexaadka jidka Soomaaliya ee horumar waara iyo dowlad wanaag.




## Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo Ka Qaybgashay Madasha Xuquuqda Internet-ka Afrika – 24-ka September 2025

Dalladda SONSA ayaa ka qaybgalay maalintii labaad ee Madasha Xuquuqda Internet-ka ee Afrika 2025, oo lagu qabtay magaalada Windhoek ee dalka Namibia intii u dhaxaysay 24–26 September. Madashan heer qaaradeed ayaa isu keenaysa daneeyayaal kala duwan si ay uga doodaaan arrimaha muhiimka ah ee la xiriira xuquuqda dhijitaalka, maamulka internet-ka iyo ilaalinta goobaha rayiga dadweynaha.

Madashu waxay u adeegtaa sidii madal lagu wadaago khibrado iyo xeelado ku saabsan sidii loo ilaalin lahaa xorriyadda internet-ka, isla markaana loo horumarin lahaa ka-qaybgal loo dhan yahay oo ku saleysan isbeddelka dhijitaalka ee si xawli ah uga socda qaaradda Afrika.

Wakiillada Soomaaliyeed ayaa si firfircoon uga qaybgalay doodaha ku saabsan amniga internet-ka (cybersecurity), ka-qaybgalka bulshada iyo hubinta sinnaanta helitaanka internet furan oo ammaan ah. Ka qaybgalka SONSA ayaa hubiyay in aragtiyaha iyo caqabadaha Soomaaliya lagu soo bandhigo doodaha ballaaran ee ku saabsan isbeddelka dhijitaalka qaaradda.

Madashu waxay muujisay muhiimadda iskaashiga ka dhexeeya bulshada rayidka, dowladaha iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay ee dejinta qaab-dhismeedyo ilaalinaya xuquuqda isla markaana ballaariya fursadaha. Ka qaybgalka bulshada rayidka Soomaaliyeed ayaa mar kale xaqiijiyay sida ay uga go'an tahay xoojinta u-doodista internet xor ah, ammaan ah, loo dhan yahay, kaas oo tiir u ah dimuqraadiyadda iyo xuquuqda aadanaha Afrika.





## Kulan Dood Wadaag Bulshada Rayidka Soomaaliyeed So Agaasintay Ku Saabsan Dastuurka KMG ah – 26-ka September 2025

Dood telefishan oo cinwaankeedu ahaa "CSOs Review the Somali Provisional Constitution and Key Legislative Frameworks" ayaa lagu qabtay Muqdisho, iyadoo qayb ka ah mashruuca Gole-Kaab, waxaana baahisay Universal TV. Doodda ayaa si guul leh ku soo gebagebowday, iyadoo ka qaybgalayaashu si firfircoon uga qeybqaateen falcelin, su'aalo iyo falanqeyn ku saabsan dib-u-eegista socda ee Dastuurka KMG ah ee Soomaaliya. Madashu waxay siisay bulshada rayidka fursad ay kula falgalaan martida doodda iyo in lagu jeexo arrimaha ugu waaweyn ee la xiriira dib-u-habeynta dastuurka.

Qayb ka mid ah ka qaybgalayaasha ayaa diiradda saaray xaaladda siyaasadeed ee haatan dalka ka jirta, iyagoo su'aalo ka keenay in waqtiga xaddidan ee maamulka dowladda hadda jirta uu ku filan yahay dib-u-eegis dhab ah oo dastuurka ah. Waxaa sidoo kale si xoog leh loo muujiyay baahida loo qabo in la sameeyo wacyigelin ballaaran, talo-ururin guud iyo wadahadallo loo dhan yahay si loo helo heshiis iyo sharciyad ku saabsan wax ka beddel kasta oo la soo jeediyo.

Waxaa laga digay in haddii lagu degdego xaaladaha hadda jira, ay taasi ka dhalan karto muran cusub oo dastuur ah halkii ay xal u noqon lahayd. Sidaa darteed, dooddu waxay ku adkaysay muhiimadda wadatashi dhab ah oo la gaarsiiyo shacabka.

Dooddan ayaa mar kale xaqiijisay kaalinta muhiimka ah ee bulshada rayidka Soomaaliyeed ku leedahay ilaalinta hufnaanta iyo ka-qaybgalka bulshada ee dib-u-habeynta maamulka. Waxa kale oo lagu adkeeyay mas'uuliyadda bulshada rayidka ee ilaalinta mustaqbalka dimuqraadiyadda Soomaaliya iyo xoojinta wadahadalka daneeyayaasha kala duwan.




### SONSA oo La Wadaagtay Aragtiyo ku Saabsan Amniga Internet ka Soomaaliya Ee Shirka FIFAfrica – 26-ka September 2025

Dalladda SONSA ayaa si firfircoon uga qaybgalay Shirka Xuquuqda Internet-ka ee Afrika (FIFAfrica) 2025, kaas oo muddo saddex maalmood ah lagu qabtay magaalada Windhoek ee dalka Namibia. Shirkan ayaa isu keenay u-doodayaasha xuquuqda dhijitaalka, siyaasiyiinta iyo hoggaamiyeyaasha bulshada rayidka ee qaaradda si loo horumariyo xorriyadda internet-ka iyo maamulka dhijitaalka ee loo dhan yahay.

SONSA ayaa si wadajir ah ula martigelisay dood aqooneed ay ka qeybqaateen la-hawlgalayaal ay ka mid ahaayeen Oxfam Somalia, Oxfam Ireland, Mzalendo iyo Access Now, iyadoo diiradda lagu saaray ilaalinta xogta iyo amniga internet-ka ee Afrika.

Intii lagu guda jiray fadhiga, Isuduwaha Mashruuca ee SONSA, Mudane. Axmed Xuseen Iiman, ayaa soo bandhigay socdaalka xuquuqda dhijitaalka ee Soomaaliya. Waxa uu sharaxay dhismaha Hay'adda Dhowrista Xogta (Data Protection Authority) iyo caqabadaha ku saabsan hirgelinteeda. Waxa kale oo uu xusay ansixinta Golaha Wasiirrada ee Xeerka Dembiyada Internet-ka bishii Agoosto 2025, kaas oo weli sugaya in loo gudbiyo doodda iyo ansixinta Baarlamaanka.

Ahmed ayaa si gaar ah uga digay baahida degdegga ah ee u doodista bulshada rayidka Soomaaliyeed si loo dhiirrigeliyo dowladda inay saxiixdo oo ay meelmariyo Heshiiska Malabo ee Midowga Afrika. Waxa uu ku tilmaamay heshiiskan mid muhiim u ah xoojinta ilaalinta xogta gaarka ah, dhismaha kalsoonida dadweynaha iyo difaaca goobaha internet-ka ee ay adeegsadaan shacabka, suxufiyiinta iyo u-doodayaasha xuquuqda aadanaha.



### SONSA oo Soo Gabagabeeysay Ka-qaybgalka FIFAfrica 2025, Iyado Sii Wanaagsan Oga Soo Qaadatay – 26-ka September 2025

Dalladda ayaa soo gabagabeeyay saddex maalmood oo ka-qaybgal ah shirkii FIFAfrica 2025 ee lagu qabtay magaalada Windhoek ee dalka Namibia, iyadoo ay ku biirtay baaqyada la jeediyay ee xoojinta ilaalinta xuquuqda dhijitaalka ee Soomaaliya iyo guud ahaan Afrika.

SONSA ayaa tilmaantay in shirka FIFAfrica uu ahaa madal dhiirrigelin ah oo isu keentay bulshada rayidka, u-doodayaasha xuquuqda dhijitaalka iyo siyaasiyiinta, si wadajir loogu qaabeeyo qaab-dhismeedyo lagu gaari karo deegaan dhijitaal oo ammaan ah, furan, isla markaana loo dhan yahay.

Isuduwaha Mashruuca SONSA, Ahmed Hussein Iman, ayaa ku celiyay muhiimadda ay leedahay in Soomaaliya ay saxiixdo oo ay meelmariyo Heshiiska Malabo ee Midowga Afrika, isla markaana ay dejiso sharciyo mudnaanta siinaya xuquuqda dhijitaalka, dhisaya kalsoonida shacabka iyo hubinaya isticmaalka internet ammaan ah. Waxa uu uga digay in isbeddelka dhijitaalka ee Soomaaliya uu si gaabis ah u socdo, isagoo ku baaqay doonis siyaasadeed oo xooggan, sharciyo adag iyo iskaashi heer gobol ah.

Gunaanadkii shirku waxa uu iftiimiyay diyaar garowga bulshada rayidka Soomaaliyeed ee ah in ay sii wadaan u-doodista isbeddel dhijitaal oo ku dhisan xuquuqda aadanaha, isla markaana ay doodaha heer qaaradeed u rogaan tallaabooyin wax ku ool ah oo difaaca bulshada nugul ee halista ugu jira goobaha dhijitaalka.



## Somali Civil Society Marks International Day for Universal Access to Information - September 28, 2025

On 28 September 2025, Somali civil society joined the international community in commemorating the International Day for Universal Access to Information, observed this year under the theme "Ensuring Access to Environmental Information in the Digital Age."

The theme highlights the growing importance of making environmental data — including information on climate change, pollution, biodiversity loss, and disasters — available to all. Without access to this vital knowledge, communities are unable to prepare for the future, protect their rights, or contribute to building sustainable peace.

Through the Gole-Kaab Project, Somali Non-State Actors (SONSA) emphasized that access to information extends beyond governance to include environmental, human rights, and development dimensions. Civil society leaders noted that democracy cannot function without informed citizens and that withholding information risks fostering abuse of power, while openness builds trust and inclusion.

They reaffirmed that access to information is both a constitutional guarantee and an international right. Protecting it, they stressed, is essential to Somalia's democratic future, enabling citizens to participate meaningfully in decisions that shape their lives and ensuring that the principles of peace, accountability, and transparency remain central to governance and development.
As this month's bulletin concludes, Somali Non-State Actors (SONSA) reaffirms its dedication to advancing universal access to information as a cornerstone of accountability, peace, and participation.

Access to information is not only a constitutional guarantee but also a vital instrument for empowering citizens to engage meaningfully in decisions that shape their lives.

Without openness, communities are left vulnerable to exclusion and abuse of power; with transparency, trust is built and democratic governance takes root.



## Xubnaha Korjoogtada Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo Ka Qaybgashay Furitaanka Kalfadhiga 7aad ee Golaha Shacabka – 29-ka September 2025

Xubnaha bulshada rayidka Soomaaliyeed ee korjoogtada ah ayaa ka qaybgalay furitaanka rasmiga ah ee Kalfadhiga 7aad ee Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, iyadoo qayb ka ah mashruuca Gole-Kaab. Ka qaybgalka bulshada rayidka ayaa muujinaya sida ay uga go'an tahay in ay ku biiraan, una korjoogteeyaan geeddi-socodka sharci-dejinta dalka.

Munaasabadda furitaanka waxaa si rasmi ah u daahfuray Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Xasan Sheekh Maxamuud, iyadoo ay garab taagnaayeen Guddoomiyaha Golaha Shacabka, Mudane Aadan Maxamed Nuur (Madobe), Guddoomiyaha Aqalka Sare, Mudane Cabdi Xaashi, iyo labada ku-xigeen ee baarlamaanka labada aqal. Xafladdu waxay calaamad u noqotay mid ka mid ah kulamada ugu muhiimsan ee siyaasadeed ee dalka.

Furitaanka kalfadhigan cusub ayaa loo arkay marxalad muhiim ah oo ka mid ah geeddi-socodka dimuqraadiyadeed ee Soomaaliya, halkaas oo bulshada rayidka ahi ay weli door muuqda ka ciyaarayaan, gaar ahaan dhiirrigelinta isla-xisaabtanka, daahfurnaanta iyo dowlad wanaagga loo dhan yahay. SONSA iyo ururrada kale ee bulshada rayidka ah waxay si joogto ah u adkeeyaan muhiimadda ay leedahay ka-qaybgalka shacabka ee go'aanada heer qaran.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda, Mudane Xasan Sheekh Maxamuud, ayaa khudbaddiisa ku caddeeyay inuu sii wadi doono wadahadal iyo la-tashi lala yeesho daneeyayaasha aan weli qayb ka ahayn habka siyaasadeed ee socda. Tani waxay muujinaysaa baahida loo qabo wada-hadal iyo heshiis siyaasadeed oo ballaaran si loo xoojiyo kalsoonida, loona horumariyo nabadda iyo maamul wanaagga Soomaaliya.






**Bulshada Rayidka Soomaaliyeed oo Ka Qaybgashay Shirweynaha Bulshada Rayidka Bariga Afrika 2025 – Nairobi, Kenya, 29-ka September – 1-da October 2025**

Bulshada rayidka Soomaaliyeed oo ay hoggaaminayso Dalladda Bulshada Rayidka ee SONSA isla markaana uu horkacayay Agaasimaha Fulinta ee Mudane. Maxamed Cadceed Cali, ayaa ka qaybgalay Shirweynaha Bulshada Rayidka Bariga Afrika 2025 (CSO Summit 2025) oo ka dhacay magaalada Nairobi ee dalka Kenya intii u dhaxaysay 29-ka September ilaa 1-da October. Shirkan waxaa soo qabanqaabiyay Ururka Bulshada Rayidka Bariga Afrika (EACSOF).

Shirweynaha ayaa isu keenay in ka badan 400 ergo oo ka kala socday bulshada rayidka, hay'adaha dowladaha, jaamacadaha, warbaahinta, deeq-bixiyeyaasha iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay, si ay uga wada hadlaan arrimaha muhiimka ah ee ku saabsan isku xidhka gobolka, dowlad wanaagga, koboca dhaqaalaha iyo horumarka waara.

Shirka sannadkan oo lagu qabtay hal-ku-dhigga "Hal-abuurnimo lagu Xoojinayo Isku-xidhka Gobolka: Horumarinta Maamul Wanaagga, Koboca Dhaqaalaha iyo Ka-qaybgalka Bulshada ee Xilligaan Dijitaalka ah" ayaa xoogga saaray doorka muhiimka ah ee tiknoolajiyadda iyo hal-abuurnimada ku leeyihiin qaabaynta mustaqbalka Bariga Afrika. Doodaha ayaa diiradda lagu saaray arrimo ay ka mid yihiin isbeddelka dhijitaalka, adkaysiga dhaqaalaha, dimuqraadiyadda, la-dagaallanka isbeddelka cimilada, iyo ka-qaybgalka dhalinyarada iyo haweenka.

Mudane. Maxamed Cadceed Cali, Agaasimaha Fulinta ee SONSA, ayaa khudbaddiisa ku adkeeyay muhiimadda ay leedahay in ururrada bulshada rayidka Bariga Afrika ay yeeshaan isku-xidh, iskaashi iyo wada-shaqeyn si loo xoojiyo cod mideysan oo bulshada rayidka ah ku difaacaan nabadda, dimuqraadiyadda, isla-xisaabtanka iyo dowlad wanaagga bulshada ku dhisan. Furitaanka shirweynaha ayaa lagu muujiyay baaq xoog leh oo ku saabsan in la horumariyo hufnaanta, hal-abuurnimada iyo ka-qaybgalka loo dhan yahay si loo dhiso Bulsho Wadajir ah oo Bariga Afrika ah.

